

DEVELOPMENTAL DISABILITIES ADMINISTRATION (DDA)
**Codsiga loogu talagalay Go'aaminta U-
qalmiitaanka DDA**

Request for DDA Eligibility Determination

FOR OFFICE USE ONLY

Initial Reapplication

DDA NUMBER:

Macluumaadka Codsadaha				
MAGACA KOOWAAD		XARAFKA BILOOWGA MAGACA DHEXE	MAGACA DAMBE	TAARIIKHDA DHALLASHADA
JINSIGA <input type="checkbox"/> Dhedig <input type="checkbox"/> Lab <input type="checkbox"/> Aan la garanay / la sheegin	XAALADDA GUURKA <input type="checkbox"/> Aan Wali Guursan <input type="checkbox"/> La furay <input type="checkbox"/> Xaas ah <input type="checkbox"/> Kala tageen <input type="checkbox"/> Lammaane Aan guursan <input type="checkbox"/> Laga dhintay	BAAHYADA WAR-ISGAARSIINTA EE CODSADAHA Turjubaan Loo Baahanyahay: <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya Dukumeentiyo Turjuman: <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya Luuqada aasaasiga ah ee ku qoran:	Ku hadla Af Ingiriisi: <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya <input type="checkbox"/> Xaddidan Fahmaya Af Ingiriisi: <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya <input type="checkbox"/> Xaddidan Luuqada aasaasiga ah ee lagu hadlo:	ISQORID QABIILEED LAMBARKA DAMAANNADA BULSHADA HEERKA WAXBARASHO EE UGU SAREEYA AMA NOOCA UU YAHAY
XEERARKA QOMWIYADEED (DOORO DHAMMAAN INTA KHUSEYSA) <input type="checkbox"/> Ameerikan ama Dhalad Alaskan <input type="checkbox"/> Madow ama Afrikaan Maraykan ah <input type="checkbox"/> Caddaan <input type="checkbox"/> Aasiyan <input type="checkbox"/> Dhalad Hawayan / Jasiiradle Kale oo Baasifig ah <input type="checkbox"/> Aan la sheegin				HISBAANIK <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
MEDICARE <input type="checkbox"/> Haa; nooca: <input type="checkbox"/> Maya Ceymis kale:	XAALADA GURIGA CAADIGA AH EE CODSADAYAASHA <input type="checkbox"/> Xarun Qof weyn oo- Rukhsadaysan <input type="checkbox"/> Guri la'aan <input type="checkbox"/> Guri qaraabo <input type="checkbox"/> Guriga korshada – cunuga <input type="checkbox"/> Cusbitaalka, caafimaadka <input type="checkbox"/> Gurigiisa <input type="checkbox"/> Xarun Baxnaanis / Xabsi <input type="checkbox"/> Isbitaal, xarun caafimaad dhimirka ah <input type="checkbox"/> Guri Waalid <input type="checkbox"/> Xarun Kalkaalin <input type="checkbox"/> Waxkale, sharaxaad ka bixi:			
CINWAANKA WADDADA	MAGAALADA	GOBOLKA	FURAHA XAAFADA	DEGMADA LA DEGAN YAHAY
CINWAANKA BOOSTADA (HADDII UU KA DUWANYAHAY MIDKA HORE) MAGAALADA GOBOLKA FURAHA XAAFADA				WASHINGTON WAA GURIGA DIIWAANKA EE MILATERIGA <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
LAMBARKA TELEEFONKA AASAASIGA AH () -	<input type="checkbox"/> TELEEFONKA GACANTA <input type="checkbox"/> TELEEFON GURI <input type="checkbox"/> TELEEFON SHAQO <input type="checkbox"/> FARRIIN	LAMBAR TELEEFON KALE () -	<input type="checkbox"/> TELEEFONKA GACANTA <input type="checkbox"/> TELEEFON GURI <input type="checkbox"/> TELEEFON SHAQO <input type="checkbox"/> FARRIIN	CINWAANKA BOOSTADA
QOR LIISKA DEGMOOYINKA DUGSIGA EE UU DHIGTAY IYO TAARIIKHAHA				
NOO SHEEG SABABTA AAD U CODSANAYSID				
NAAFADA KORIINKA IYO DA'DA MARKII UGU HORAYSAY LAGU OGGAADAY NOOCA CUDURKA Da'da markii ugu horaysay ee lagu oggaaday nooca cudurka: <input type="checkbox"/> Ootisim <input type="checkbox"/> Qalal <input type="checkbox"/> Maskax Suux <input type="checkbox"/> Naafonimada Caqliga <input type="checkbox"/> Xaalad Koromosoomyada ah <input type="checkbox"/> Xaalad Dareemayaasha ah <input type="checkbox"/> Dib-u-dhaca Koritaanka			CODSIGA ADEEGGA GO'AAMINTA NAAFONIMADA Ma dalbaday codsadahe Dheefaha Naafonimada ee Damaannada Bulshada, Dakhliga Damaannada Dheeraadka ah, ama Caawimaada Caafimaadka Aan-Deeqda ahayn ee Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada sannadkii la soo dhaafay? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya	
Macluumaadka Wakiilka				
MAGACA KOOWAAD		XARAFKA BILOOWGA MAGACA DHEXE	MAGACA DAMBE	LUUQADA AASAASIGA AH
CINWAANKA BOOSTADA		MAGAALADA	GOBOLKA FURAHA XAAFADA	Turjubaan: <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya Turjumaada: <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
LAMBARKA TELEEFONKA AASAASIGA AH () -	<input type="checkbox"/> TELEEFONKA GACANTA <input type="checkbox"/> TELEEFON GURI <input type="checkbox"/> TELEEFON SHAQO <input type="checkbox"/> FARRIIN	LAMBAR TELEEFON KALE () -	<input type="checkbox"/> TELEEFONKA GACANTA <input type="checkbox"/> TELEEFON GURI <input type="checkbox"/> TELEEFON SHAQO <input type="checkbox"/> FARRIIN	CINWAANKA BOOSTADA
NOOCA XIRIIRKA / DOORKA		XIRIIRKA SHARCIYEED (KU SOO LIFAAQ DUKUMEENTYADA)		LA NOOL CODSADAHA <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
MAGACA WAKIILKA KALE / DOORKA / EMAIL-KA				
MAGACA WAKIILKA KALE / DOORKA / EMAIL-KA				
Sixiixa(yada)				
SAXIIXA CODSADAHA QAANGAARKA AH			TAARIIKHDA	
SAXIIXA WAALIDKA AMA WAKIILKA SHARCIGA AH		TAARIIKHDA	XIRIIRKA SHARCIGA AH	

Codsiga loogu talagalay Tilmaamaha Go'aaminta U-qalmitaanka Maamulka Naafonimada Koritaanka

Qor Liiska Lifaayada Loo Baahan Yahay Codsigaan lama aqbalayo isaga oo aan la socon lifaayada loo baahan yahay.

- Codsiga la Sixiixay ee leh dhammaan qaybaha la dhammeystiray.
- Foomka HIPAA ee sixiixan (Ogeysiiska Hab-dhaqanada Asturnaanta).
- Oggolaanshaha La sixiixay ee lagu Bedelayo Macluumaadka Khaaska ah – ku dar lambarada teleefoonka dhammaan xiriirada.. Codsadaaasha 13 jirka ah ama ka weyn waa in ay saxiixaan.
- Haddii uu jiro wakiil sharci ah, nuqulo ku saabsan waraaqaha mas'uulnimada ama dokumeentiyo maxkamad kale oo tusinaya awood maamuleed.

Macluumaadka Codsadaha Codsaduhu waa qofka loo codsaday U-qalmitaanka Maamulka Naafonimada Koritaanka.

Magaca Codsadaha: Geli magaca sharciga ah ee codsadaha. Ha gelinin naanaysta.

Taariikhda dhallashada: Geli bisha, maalinta iyo sannadka ee taariikhda dhallasho ee codsadaha.

Jinsiga: Dooro jawaabta ku habboon ama ku qor ma oggi/lama sheegi karo haddii codsadaha uu dooranayo in uusan ka jawaabin su'aashan.

Xaalada Guur ee Codsadaha: Sheeg xaalada guur ee hadda ah ee codsadaha.

Xiriirka: Sheeg qaabka(qaababka) xiriirka codsadaha.

Haddii codsadaha u baahdo turjubaan afka ah ama mid qoraal ah oo lagu sameeyo waraaqaha la isdhaafsado saar calaamada sax khaanada si aad ugu sheegtid HAA.

Sheeg haddii codsadaha uu ku hadlo, fahmo ama uu yahay mid uu ku adagyahay luuqada Ingiriiska.

Qor luuqada aasaasiga ah ee uu ku hadlo oona qoro codsadaha ama qaabka xiriirka, ay ku jirto Luuqada dadka Indhoolaha ah ee Maraykanka (ASL) ama luuqado kale oo luuqadaha dadka indhoolayaasha ah, sida Braille, ama haddii codsadaha uu isticmaalo adeega TDD ama qalab kale oo lagu xiriiro.

Isqorida Qabiileed: Qor isqorida qabiileed ee codsadaha, haddii uu mid jiro. Haddii kale, qor "Aan Habboonayn."

Lambarka Dammanada Bulshada: Qor Lambarka Dammanada Bulshada codsadaha, haddii uu mid haysto.

Waxbarasho: Qor heerka ugu sareeya ee waxbarasho ama nooca waxbarashada uu dhigtay codsadaha.

Xeerarka Qowmiyadeed: Sheeg jawaabta(jawaabaha) sida ugu fiican u sheegaya qowmiyada codsadaha. **Hispanic:** Haddii uu codsaduhu yahay mid u dhashay Hispanic sheeg ama dheh HAA.

Medicare: Haddii uu codsaduhu qaato Medicare sheeg ama dheh HAA. Qor nooca(noocyada) Medicare: A, B, C, D.

Ceymis Kale: Geli magaca qorshe ceymis caafimaad kale (mid dowladeed ama khaas ah), haddii uu jiro.

Xaalada Guriga Caadiga ah ee Codsadaha: Dooro khaanada sida fiican ugu habboon qaabka guriga codsadaha ee hadda ah.

Macluumaadka Xiriirka: Qor cinwaanka meesha uu hadda deganyahay codsadaha, cinwaanka boostada iyo lambarka(lambarada) teleefoonka.

Degmooyinka Iskuulka: Qor degmooyinka iskuulka uu dhigtay codsadaha – ku dar lambarka teleefoonka degmo kasta. Haddii aad naga doonaysid in aynu codsano diiwaanada degmooyinka iskuulka ayay khasabtahay in lagu qoro Oggolaanshaha.

Sababta loo codsanayo: Qor sababta(sababaha) loo codsanayo sidoo kale qor adeegaha codsadaha ama qoyska codsadaha ay daneeyaan.

Naafada Koriinka: Sheeg mid ama ka baddan oo oggaanshaha cudurka loogu talagalay codsadaha iyo da'da codsadaha ah markii ugu horeysay ee la oggaaday nooca cudurka. Xur ayaad u tahay in aad isticmaashid warqad kale si aad noogu sheegtid wax baddan.

Codsashooyinka Naafada: Sheeg haddii codsadaha uu codsaday xadidaada naafada sannadkii lasoo dhaafay. Midaan waxay noqon kartaa mid ku saabsanayd Dammanada Bulshada, Dakhliga Dammanada Dheeraadka ah ama Caawimaada Caafimaadka Aan-Deeqda ahayn. Macluumaadkan wuxuu nagu caawin karaa in aynu meelayno diiwaanada.

Macluumaadka Wakiilka: Macluumaadka xiriirka iyo magaca qof awoodi doona in uu lasoo xiriiro codsadaha ama in uu na siiyo macluumaadka xiriirka haddii aynaan awoodin in aynu la hadalno codsadaha. **Luuqada Aasaasiga ah:** Qor luuqada oona sheeg haddii turjumaad afka ah iyo/mid qoraal ah loo baahanyahay.

Nooca Xiriirka/Doorka: Qor sida uu wakiilku u garanayo codsadaha ama uu xiriir ula yahay.

Wakiilka Sharciga ah: Qor xiriirka sharciga ah haddii uu mid jiro. Wakiilka Sharciga ahi waa waalidka ilmaha ka yar sideed iyo tobban jir midkaas oo haysta go'aan sharciiyeed awood u siinaya; masuuliyada sharciiyeed ee qofka; qofka haysta masuuliyad xadidan marka masuuliyad xadidan ay leedahay awood ku saabsan go'aanada daryeelka caafimaadka; qareenka qofka ee sharciga; xaqiiqdii qareenka qofka waa (qof leh awood qareen midkaas oo loo oggolaaday in uu qaato ama sameeyo go'aanada daryeelka caafimaadka); ama qofkale oo dhinaca sharciga looga oggolaaday in uu matalo qofka arinta khuseyso. Qorida xiriirka sharciga ah waa in lagu daro codsiga.

Sixiixa Codsadaha iyo/ ama Wakiilka Sharciga ah Haddii codsadaha uu yahay mid da'diisu ka yartahay 18 sanno, asaga ama ayada waalidkeeda ama wakiilka sharciga ah waa in uu sixiixo oona taariikhda ku qoro codsiga. Haddii codsadaha uu jiro 18 ama ka weyn, midkoodna codsadaha ama wakiilkiisa ama wakiilkeeda sharciga ah waa in ay sixiixaan oona ku qoraan taariikhda codsiga.

U soo-celi codsiga iyo lifaayada loo baahanyahay xafiiska warqad isdhaafsiga hoose.

Gobolka 1 Xarumaha saldhiga ah (Degmooyinka loo adeegay: Adams, Asotin, Benton, Chelan, Columbia, Douglas, Ferry, Franklin, Garfield, Grant, Kittitas, Klickitat, Lincoln, Okanogan, Pend Oreille, Spokane, Stevens, Walla Walla, Whitman, Yakima)

1611 W INDIANA AVE

SPOKANE WA 99205-4221

Taleefoon Lacag La'aan ah: 1-800-462-0624

Gobolka 2 Xarumaha saldhiga ah (Degmooyinka loo adeegay: Island, King, San Juan, Skagit, Snohomish, Whatcom)

20311 52ND AVE W STE 302

LYNNWOOD WA 98036-3901

Taleefoon Lacag La'aan ah: 1-800-788-2053

Gobolka 3 Xarumaha saldhiga ah (Degmooyinka loo adeegay: Clallam, Clark, Cowlitz, Grays Harbor, Jefferson, Kitsap, Lewis, Mason, Pacific, Pierce, Skamania, Thurston, Wahkiakum)

1305 TACOMA AVE S STE 300

TACOMA WA 98402-1903

Taleefoon Lacag La'aan ah: 1-800-248-0949

Si aad u heshid macluumaad baddan oo ku saabsan U qalmitaanka Maamulka Naafoyinka Koriinka, gal boggaan internetka ah

<https://www.dshs.wa.gov/dda/consumers-and-families/eligibility>.